

IRB #:

Study Title:

Principal Researcher:

Revision Date:

---

### General Instructions:

- Please delete this page and the **instructional text/green highlights** throughout the document.
- **Text in this document is required and not editable in general. Please include this text, do NOT edit it, and do not delete any of the text except as directed. Editing/deleting this text may put your study in violation of HIPAA or other privacy requirements.**
- Fill in the Header Information; do not modify information in the footer.
- Follow directions given throughout the form.

IRB #:

Study Title:

Principal Researcher:

Revision Date:

---

## **Rukhsaynta Isticmaalidda, Abuuridda iyo Wadaagidda Macluumaadka Caafimaadka loogu talagalay Cilmibaarista**

Magaca Daraasadda:

Magaca PI:

Macluumaadka Xiriirka PI:

Ujeeddada foomkani waxa weeyaan in aad rukhsad siiso kooxda cilmibaarista si ay u abuuraan, u isticmaalaan ama u wadaagaan macluumaadkaaga caafimaadka ee dhawran (protected health information) (PHI). **Fadlan foomkan si taxaddar leh u akhriso.**

Si aad daraasaddan cilmibaarista ugu jirto, waa in aad saxiixdo foomkan rukhsaynta. Ka dib marka aad foomkan akhrisato, waxaad diidi kartaa in aad foomkan saxiixdo. Haddii aadan rabin in aad saxiixdo foomkan rukhsaynta, tani ma saamayn doonto daryeelka iyo daawaynta aad hesho. Waxaa weliba lagaa codsan doonaa in aad saxiixdo foomka oggolaanshaha cilmibaarista oo lagu qeexay faahfaahinta cilmibaarista. Haddii aad su'aalo ka qabto foomkan rukhsaynta ama foomka oggolaanshaha cilmibaarista, waqti kaste ayaad weydiin kartaa kooxda cilmibaarista.

Ereyga “adigu/adiga” ee foomkan ku jira waxaa laga yaabaa in uu tilmaamayo adiga ama ilmahaaga.

### **Maxaa Lagu Samayn doonaa Macluumaadkayga PHI?**

Haddii aad daraasadda ku biirto, waxaan annagu macluumaadkaaga PHI sir ugu hayn doonaa sida uu sharcigu dhigay.

Waxaa kuu yaalla xuquuq sireed oo gaar ah oo khuseeya macluumaadkaaga PHI. Marka aad adigu rukhsayso oo keliya ayaan daraasaddan u abuuri karnaa, u isticmaali karnaa, ama ugu wadaagi karnaa macluumaadkaaga PHI. Waxyaabaha soo socda ayaa qeexaya nooca macluumaadka PHI ee daraasadda lagu abuuri doono, lagu isticmaali doono ama lagu wadaagi doono, cidda isticmaali karta ama wadaagi karta, iyo ujeedooyinka laga yaabo in loo isticmaalo ama loo wadaago.

Macluumaadka PHI waxaa ka mid noqon kara waxyaabaha ay ka mid yihiin:

- Diiwaannadii caafimaadka ee hore ama kuwa mustaqbalka,
- Diiwaannada cilmibaarista, sida sahaminada, xogwaraysiyada, waraysiyada, ama warbixinnada iskaa ah ee ku saabsan taariikhda caafimaadka,

**IRB #:****Study Title:****Principal Researcher:****Revision Date:**

- 
- Diiwaannada caafimaadka ama shaybaarka ee la xiriira daraasaddan, ama
  - Macluumaadka adiga si gaar ah kuu khuseeya sida magacaaga, cinwaankaaga, maalintaada dhalashada, asalkaaga jinsiyadeed, ama lambarrada lagugu garto sida lambarkaaga badbaadada bulsheed (social security number).

Waxaa laga yaabaa in macluumaadka PHI ay abuuraan, ay isticmaalaan ama lala wadaago:

- Cilmibaareyaasha (sida takhaatiirta iyo shaqaalahooda) ka qayb qaadnaya daraasadda halkan iyo xarumaha kale,
- Kafaale qaadeyaasha cilmibaarista – waxaa tan ka mid ah dadka ama shirkadaha u shaqeeya, la shaqeeya, ama uu iska leeyahay kafaale qaaduhu,
- Dadka ama ururrada kale ee ku lug leh daryeelkaaga caafimaadka,
- Guddiyada dib u eegista (sida Guddiga Dib u eegista Xarumaha (Institutional Review Board) ee isbitaalka Seattle Children's), guddiyada ilaaliya xogta iyo badbaadada, iyo kuwa kale ee ka masuul ah dul ka eegista dhaqangelinta cilmibaarista (sida goobjoogeyaasha),
- Hay'adaha dawliga ah sida Maamuka Cuntooyinka iyo Daawooyinka (Food and Drug Administration) (FDA) ee Maraykanka, Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegyada Adamaha (Department of Health and Human Services) (DHHS) iyo hay'ado la siman oo ka jira waddamo kale, ama
- Masuuliyiinta caafimaadka dadweynaha ee ay sharci ahaan waajib nagu tahay in aan macluumaadka ka wargelinno si looga hortago ama loo xakameeyo cudurrada, dhaawaca, ama naafada.

Waxaa laga yaabaa in macluumaadka PHI la abuur, la isticmaalo, ama la wadaago si:

- Loo baaro natiijooyinka cilmibaarista,
- Loo fiiriyo haddii daraasaddan si sax ah loo qabtay,
- Loo buuxiyo oo loo daabaco natiijooyinka daraasadda lagu qeexay foomkan,
- Loo addeeco ama loo raaco waajibaadka aanan cilmibaarista khusaynin (sida ka wargelinta dad kale haddii aan u aragno in adiga ama qof kale ay waxyeello idin gaari karto), ama
- Loo suurto geliyo daryeelkaaga caafimaadka.

### **Miyaan anigu Dib u eegi karaa macluumaadkayga PHI?**

Waxaa kuu furan in aad eegto ama nuqul ka samaysato macluumaadka laga yaabo in la abuur, la isticmaalo ama la wadaago. Hase yeeshee, wixii khuseeya noocyada daraasadaha cilmibaarista qaarkood, waxaa laga yaabaa in aadan heli karin qaar ka mid ah macluumaadkaaga PHI waqtiga daraasaddu socoto. Tani ma saamaynayso xaqa aad u leedahay in aad aragto waxa ku jira diiwaannadaada caafimaadka (isbitaalka).

IRB #:

Study Title:

Principal Researcher:

Revision Date:

---

### **Goormee Ayu Dhammaan Doonaa Waqtiga Rukhsayntaydu?**

Rukhsaynta aad ka bixiso abuurista, isticmaalka ama wadaagista macluumaadkaaga PHI waqtigeedu ma dhammaan doono, laakiin waqti kaste ayaad taas tirtiri kartaa ama burin kartaa. Waxaa tan samayn kartaa marka aad kooxda daraasadda qoraal ku ogaysiiso. Haddii aad rukhsayntaada tirtiro, adiga lagaama qaadi doono macluumaad PHI cusub. Hase yeeshee, waxaa laga yaabaa in macluumaadka hore loo qaaday ama loo guray weli la isticmaalo oo lala wadaago dadka kale.

Waxay cilmibaareyaashu sanado farabadan sii wadaan falanqaynta xogta, oo suurogal marwalba ma aha in la ogaado goorta ay hawshaas dhammayn doonaan. Haddii ay daraasaddan qayb ka tahay in macluumaadkaaga PHI la kaydiyo, waxaa laga yaabaa in mustaqbalka loo isticmaalo cilmibaaris kale. Annagu rukhsayn kuma weydiisan doonno ka hor cilmibaaristan mustaqbalka ah.

(Note: Include the following paragraph if study includes treatment, care, or diagnosis)

### **Macluumaadka Ka Soo Baxa Daraasaddan Miyaa La Gelin Doonaa Diiwaankayga Caafimaadka?**

Macluumaadka ka soo baxa daraasaddan waxaan weliba gelin karnaa diiwaannadaada caafimaadka, xataa foomkan, maxaa yeelay waxaa daraasaddan qayb ka ah daryeelkaaga. Diiwaannada caafimaadka waxaa u yaalla xeerar ka duwan diiwaannada cilmibaarista. Diiwaannada caafimaadka waxaa eegi kara dadka kale ee ku lug leh daryeelkaaga, sida takhaatiirta, caymis bixiyeyaasha, iyo dad kale sida uu sharcigu dhigayo.

### **Ma Jiraan Habab Kale Oo Lagu Wadaagi Karo Macluumaadkayga PHI?**

Abuuridda, isticmaalidda ama wadaagidda macluumaadkaaga PHI waxaan u raaci doonaa shuruucda khuseeya sirta, laakiin waxay shuruucdani qabanayaan oo keliya takhaatiirta, isbitaallada, iyo dadka kale ee bixiya daryeelka caafimaadka. Qaar ka mid ah dadka daraasaddan qayb ka ah ee hela macluumaadkaaga caafimaadka ayaa laga yaabaa in ay dad kale la wadaagaan adigoo aanan rukhsaynin haddii ay taas u rukhsaynayaan shuruucda iyaga waajib ku ah in ay raacaan.

Haddii natijoooyinka daraasadda la daabaco ama la xayaysiiyo, lama isticmaali doono macluumaadka adiga lagugu garanayo.

Waxaa rukhsayntaada caddaynaysa saxiixidda dhanka hoose ee foomkan. Haddii aad go'aansato in aanan annagu macluumaadkaaga PHI abuur karin, isticmaali karin oo/ama wadaagi karin, adigu kama qayb gali kartid daraasaddan.

IRB #:  
Study Title:  
Principal Researcher:  
Revision Date:

*(Note: For the following section in italics, delete any types of information that do not apply to your study. If none apply, delete the whole section.)*

### **Rukhsaynta Goonida ah ee loogu talagalay Macluumaadka Gaarka ah**

*Abuurista, isticmaalka ama wadaagista macluumaad noocyo gaar ah leh ee loo sameeyo cilmibaaristan waxaa loogu baahan yahay rukhsayn gooni ah, xataa dhanka carruur gaar ah (dhowr iyo toban jirka ku jira qaybaha da'da ee hoose). Dhammaan carruurta kale, waalidka/wakiilka sharci ahaan rukhsaysan ee rukhsaynta bixinaya ayaa qaybtan iyaga u buuxin doona. Haddii aad waafaqsan tahay rukhsayntaada ku calaamadee xuruufta koowaad ee magacaaga oo aad hoosta ku dhigto:*

\_\_\_\_\_ *Caabuqyada galmada lagu gudbiyo xataa AIDS/HIV (qof kastoo 14 jir ah ama ka weyn)*  
Xuruufta koowaad ee magaca

\_\_\_\_\_ *Xaaladaha caafimaad ee ay ku jiraan walaacyada laga qabo caafimaadka galmada ama taranka, iyo natiijooyinka baaritaanka ku xiran (qof kastoo 14 jir ah ama ka weyn)*  
Xuruufta koowaad ee magaca

\_\_\_\_\_ *Caafimaadka/cudurka habdhaqanka ama maskaxda (qof kastoo 13 jir ah ama*  
Xuruufta koowaad ee magaca

\_\_\_\_\_ *Ku xadgudubka, cudur ka sheegista, ama daawaynta mukhaadaraadka ama khamriga (qof kastoo 13 jir ah ama ka weyn)*  
Xuruufta koowaad ee magaca

**Note: Only use the following language if the study involves optional procedures.**

### **Rukhsaynta in Macluumaadkaaga PHI loo Abuuro, loo Isticmaalo ama loogu Wadaago Nidaamyada Ikhiyaarka ah**

Waxaa cilmibaaristan ka mid ah nidaamyada ama hawlo ikhiyaar ah. Qaybta(baha) ikhiyaarka ah ee cilmibaaristan ka mid ah waa **(list optional procedures here)**. Waxaad ka qayb qaadan kartaa daraasadda ugu muhiimsan xataa haddii aadan rabin in aad samayso nidaamyada ama hawlaha ikhiyaarka ah. Haddii aad go'aansato in aad ka qayb qaadato nidaamyada ikhiyaarka

IRB #:

Study Title:

Principal Researcher:

Revision Date:

---

ah, waxaan kaaga baahan nahay rukhsayn dheeraad ah si aan macluumaadkaaga PHI ugu abuurno, ugu isticmaalno, ama ugu wadaagno nidaamyada ikhiyaarka ah. Isla xeerasha guud ee sirta khuseeya ee kor lagaga hadlay ayaa hirgali doona.

\_\_\_\_\_ Waxaan anigu rukhsaynayaa in macluumaadkayga PHI loo aburo, loo isticmaalo, oo/ama loogu wadaago nidaamyada ikhiyaarka ah.

Xuruufta  
koowaad ee  
magaca

Haddii aad rabto in aad tirtirto ama buriso rukhsaynta aad ka bixiso nidaamyada ikhiyaarka ah, waxaad tan ku samayn kartaa ogaysiin qoran oo aad annaga noo soo dirto. Rukhsaynta aad ka bixiso daraasadda cilmibaarista guud ahaanteed ayaa weli hirgali doonta haddii aad kooxda daraasadda u sheegi weydo in ay weliba tirtiraan rukhsaynta aad ka bixisay daraasadda cilmibaarista guud ahaanteed.

### **Rukhsaynta**

Waxaan anigu akhristay foomkan qeexaya sida macluumaadka PHI loo isticmaali doono. Waxaan fursad u helay in aan su'aalo ka jeediyo isticmaalka macluumaadka PHI waxaana la iiga jawaabay su'aalahaygii.

Marka aan foomkan saxiixo, waxaan oggolaanayaa in ujeedooyinka daraasaddan cilmibaarista loo aburo, loo isticmaalo, oo/ama loogu wadaago macluumaadkayga PHI. Waxaa nuqul la iga siin doonaa foomkan saxiixan.

---

*Magaca Daabacan ee Ka qaybqaataha Cilmibaarista*

---

*Saxiixa Ka qaybqaataha Cilmibaarista (haddii ka qaybqaatuhu yahay 18 jir ama ka weyn yahay)*

---

*Taariikhda*

---

*Saacadda*

IRB #:  
Study Title:  
Principal Researcher:  
Revision Date:

---

*Magaca Daabacan ee Waalidka ama Wakiilka Sharci ahaan u Rukhsaysan*

---

*Saxiixa Waalidka ama Wakiilka Sharci ahaan u Rukhsaysan (haddi ka qaybqaatuhu 18 jir ka yar yahay)*

---

*Taariikhda*

---

*Saacadda*

**Cilmibaaraha Rukhsaynta Qaada**

---

*Magaca Daabacan ee Cilmibaaraha Qaada Rukhsaynta ama Oggolaanshaha Waalidka*

---

*Saxiixa Cilmibaaraha Qaada Rukhsaynta ama Oggolaanshaha Waalidka*

---

*Taariikhda*

---

*Saacadda*